

Tilmaamaha Ka Beddelida Sittinka Luuqadaha Gudaha Baraawsarka Mareegaha

Google Chrome

1. Guji astaanta liiska ee saddexda dhibic (:) ah ee ku taal geeska kore ee midig.
2. Tag **Sittinka (Settings)**, kadibna u gudub qeybta **Luuqadaha (Languages)**. Waddo gaaban ayaa ah inaad qorto `chrome://settings/languages` gudaha ciwaanka
3. Hoosta "Luuqadaha la doorbidayo (Preferred languages)," guji **Ku dar luuqado (Add languages)**.
4. Hubi sanduuqa ku xiga luuqadda aad rabto oo guji **Ku dar (Add)**.
5. Guji astaanta liiska ee saddexda dhibic (:) ah ee ku xigta luuqadda cusub ee aad ku dartay.
6. Xulo **U dhaqaaq qaybta sare (Move to the top)** si aad uga dhigto mid gaar u ah mareegaha, ama xulo **Ku Bandhig Google Chrome-ka luuqaddan (Display Google Chrome in this language)** si aad u beddesho luuqadda aad ku aragto baraawsarka (Windows oo kaliya).
7. Dib u kici Chrome si isbeddellada loo dhaqangeliyo.

Mozilla Firefox

1. Guji astaanta liiska ee saddexda dhibic (:) ah ee ku taal geeska kore ee midig, kadibna xulo **Sittinka (Settings)**.
2. Qaybta "Guud (General)" marka aad joogto, hoos ugu dhaadhac qeybta **Luuqadda (Language)**.
3. Guji liiska hoos-u-dhaca oo xulo luuqadda horay loo taxay, ama guji Raadi **luuqadaha kale (Search for more languages)**... si aad mid cusub ugu darto.
4. Haddii aad luuqad cusub ku darto, ka dooro liiska oo guji **Ku dar (Add)**, kadibna **Haye (OK)**.
5. Isticmaal badhanka **U dhaqaaq kor (Move Up)** si luuqadda aad doorbidayso loogu u geysid qaybta ugu sareysa liiska.
6. Guji **Dabbaq oo Dib u kici (Apply and Restart)** si aad u keydiso isbeddeladaada.

Microsoft Edge

1. Guji astaanta liiska ee saddexda dhibic (...) ah ee ku taal geeska kore ee midig, kadibna xulo **Sittinka (Settings)**.
2. Guji **Luuqadaha (Languages)** ee ku yaal liiska jira dhanka biddix.

3. Guji **Ku dar luuqado (Add languages)** si aad u hesho oo ugu darto luuqadda aad rabto.
4. Guji astaanta liiska ee saddexda dhibic (...) ah ee ku xigta luuqadda cusub ee aad hadda soo kordhisay.
5. Xulo **U dhaqaaq dhanka sare (Move to the top)** ee mareegaha, ama xulo **Ku Arag Microsoft Edge-ka luuqadan (Display Microsoft Edge in this language)** kadibna guji
6. **Dib u kici (Restart)** si aad u beddesho luuqadda isdhexgalka.

Safari (Kombiyuutarka)

Luuqadda baroowsarka Safari waxaa xukuma sittinka nidaamkaaga macOS, marka aad wax ka beddesho waxay sidoo kale beddeli doontaa luuqadda lagu soo bandhigo app-yada kale.

1. Guji **Bogga Hore Apple-ka (Apple Menu)** ee ku yaal geeska kore ee biddix, kadibna xulo **Sittinka Nidaamka (System Settings)** ama (**Sittinka Doorbidaadaha (System Preferences)**) haddii aad isticmaalayso noocyo hore oo macOS ah).
2. Guji **Guud (General)**, kadibna **Luuqadda & Gobolka (Language & Region)**.
3. Jiid luqadda aad doorbidayso ilaa ay ka geyso qaybta ugu sareysa ee liiska "Luuqadaha la doorbidayo (Preferred languages)".
4. Xaqiiji isbeddelka marka ay farriinta soo muuqato.
5. Dib u kici (Restart) Safari si isbeddellada loo dhaqangeliyo.

Safari (Telefoonka Gacanta)

Si la mid ah macOS, luuqadda baroowsarka Safari ee iPhone-ka ama iPad-ka waxaa xukuma sittinka guud ee nidaamka.

1. Tag **Sittinka (Settings)**, kadibna **Guud (General)**.
2. Taabo **Luuqadda & Gobolka (Language & Region)**.
3. Jiid luqadda aad doorbidayso ilaa ay ka gaarto qaybta ugu sareysa ee **Liiska Isxigxiga Luuqadaha La Doorbidayo (Preferred Language Order list)**.
4. Dib u kici (Restart) Safari si isbeddellada loo dhaqangeliyo.